



Farriintan waxaa la soo galiyay onlaynka iyadoo ku qoran [العربية اللغة](#),

[English](#), [Русский](#), [Soomaali](#), [Español](#), [简体中文](#) iyo [Tiếng Việt](#).

**Luulyo 12, 2024**

**Ku:** Xubnaha bulshada I/DD, iskaashatada Qabiileed iyo shaqaalaha Xafiiska Adeegyada Korrinka Naafada ODDS

**Ka:** Dana Hittle, Agaasimaha Kumeelgaarka ah, Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka (ODDS)

**Mawduuca:** Kulamada bilaha ah ee lagu wadaago ra'yi-celintaada

Ma haysaa jawaab-celin aad jeelaan lahayd inaad la wadaagto hoggaanka ODDS? Su'aalo ma ka qabtaa adeegyadaada? Wuxaan kugu martiqaadayaan inaad aniga iyo hoggaanka ODDS la kulanto si aad u wadaagto ra'yi-celintaada.

Wuxaan bilaabi doonaa martigelinta kulamo bille ah oo Zoom lagu qaban doono bisha Agoosto. Cid waliba waa lagu soo dhawaynayaa inay ka soo qaybgalaan. Wuxaanu yeelan doonaa wada-hadal. Wuxaad wax badan ka ogaan doontaa adeegyadeena. Wuxaan maqli doonaa jawaabcelintaada iyo khibradahaaga.

## Macluumaaadka kulanka

- Taariikhaha: Agoosto 7, Sebteembar 4, Oktoobar 2, Nofeembar 6 iyo Arbacooyinka ugu horeeya
- Waqtiga: duhurnimo ilaa 1-da duhurnimo
- Fadlan horay isku sii diiwaangeli: Wuxaan ku weydiin doonaa ciinwaankaaga iimaylka. Sidan, waanu kugu dabagli karnaa kulanka kadib, haddii loo baahdo. Markaad isdiiwaangeliso, Zoom ayaa kuu soo diri doono iimayl leh tilmaamo aad ugu biiri karto kulanka.  
Isticmaal gujoraacan ama koodhkan:



Waad ku mahadsan tahay wakhtiga aad na siisay si aad noola wadaagto ra'yi-celintaada. Had iyo jeer waxaan ka shaqeyneynaa sii hormatinta. Ra'yi-celintaadu waxay qayb muhiim ka tahay habraacaas.

Waxaanu doonaynaa in qof walba uu dareemo soo dhaweyn iyo badqab. Taageero ayaad ku sin doonaa si aad si buuxda uga qayb qaadato, oo ay ka mid tahay:

- Luqadda Calaamadaha/Dhagoolaha Mareekanka
- Turjubaan Isbaanish
- Qoraal-hoosaad toos ah

Haddii aad u baahan tahay luqado ama taageerooyin kale, wac 503-945-5811 ama iimayl u dir [ODDS.Questions@odhs.oregon.gov](mailto:ODDS.Questions@odhs.oregon.gov) meesha lagu gaaro Luulyo 31. Waan aqbalnaa wicitaanada dadka naafada ah.

### **Fursado badan**

Waxaan sidoo kale martigelineynaa kulamo dhageysi oo fool-ka-fool ah oo gobolka oo dhan ah. Waxaan imaan doonaa Ontario Agoosto 20-21. Ka hel macluumaad dheeraad ah [boggeena cusub ee ka-qaybgalka bulshada.](#)

Waxaan rajeyneynaa inaan kula kulmo.

Daacadnimo,



Dana Hittle

Agaasimaha Kumeelgaarka ah  
Xafiiska Adeegyada Naafada Korriinka (ODDS)

---

[Rukumo si aad u hesho wargelinada ODDS.](#)

Farriimihii Hore ee Agaasimaha ODDS waxaa laga heli karaa barta  
[https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm.](https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm)

Nagala soco barta aannu ku leenahay Facebook @ORHumanServices oo  
[sahmi mareegteena.](#)

Waxaad ku heli kartaa dokumeentigan luuqado kale, daabacaad ballaaran, farta indhooleyaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Oregon ODDS lambarka 503-945-5811 ama

[dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov](mailto:dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov). Waxaanu aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhegaha La', Maqalka Ku Adag Yahay, Dhegaha iyo Indhaha La', dadka aragga la' ama araggoodu hooseeyo. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegga gudbinta booqo

<https://www.oregonrelay.com> ama <https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers>.